

## **Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo ee OR PTC DCI**

1. **Waa la isoo tuuray. Yaa i caawin kara?**
  - a. Waxaad ka wici kartaa khadka adeegga macmiilka ee DCI 24/7 lambarka: 1-855-565-0155 ama inta lagu jiro saacada shaqada caadiga ah ee Xafiiska Deegaankaaga.
2. **Waxaan u baahanahay inaan dib u baddelo lambar sireedkayga balse ma helayo ogeysiisyada iimaylka. Yaa i caawin kara?**
  - a. La xiriir Xafiiska Deegaankaaga si aad u xaqiijiso in cinwaanka iimaylka noo fayl fareysan uu saxan yahay.
3. **Maxay xaalada waqti gelintayda u tahay Unvalidated (Aan La Ansixinin)?**
  - a. Waqti gelinta aan la ansixinin waa waqti gelin u baahan inuu hubiyo nidaamka si loo hubiyo in la raacay sharciyada ganacsiga.
4. **Maxay xaalada waqti gelintayda u tahay Unverified (Aan la Xaqiijinin)?**
  - a. Waqti gelinta aan la xaqiijinin waa waqti gelin la sameeyo marka adeegsadaha jooga Xafiiska Deegaanka uu wax ka baddelo waqti gelin badalkii Bixiyaha. Waxaa muhiim ah in la xaqiijiyo qorista la sameeyay ee aan la xaqiijinin, ama haddii kale lama bixin doono mushaharkeeda.
5. **Maxaan u qori karin waqtiga bilowga shaqada?**
  - a. Ma awoodi doontid inaad qorto waqtiga bilowga shaqada haddii aad iloowday inaad qorto waqtiga dhamaadka niski ka horeeyay. Waxaa sidoo kale jira sababo kale oo aad u qori karin waqtiga bilowga shaqada sida haddii aadan heysanin oggolaansho waqti xaadirkan. Haddii aadan qori karin waqtiga bilowga shaqada, la xiriir Xafiiska Deegaankaaga.
6. **Sideen u baddelaa luuqadda aan doorbidayo?**
  - a. Adiga oo isticmaalaya bogga internetka ee OR PTC DCI, shaashada luuqadda aad doorbido waa la baddeli karaa iyada oo la dooranayo liiska luuqadda hoos u baxa ee ku yaala dhanka gacanta midig ee kore ee shaashada.
  - b. Dadka isticmaala app-ka taleefonka, marka ay galaan app-ka taleefonka OR PTC DCI, dooro safka liiska hoos u baxa kadibna luuqadda si aad u saarto luuqada aad doorbido.
7. **Maxaan ugu baahanahay inaan baddelo lambar sireedkayga?**
  - a. Lambar sireedyada waa qasab in la baddelo 60 maalmood oo kasta sababa amni aawadood.
8. **Sideen ku ogaadaa inta saacadood ee aan shaqeyn karo?**
  - a. App-ka taleefonka OR PTC DCI iyo bogga internetka waxay keydiyaan saacadahaaga haray, marka waad arki kartaa inta saacadood ee kaaga

dhiman toddobaadka. Saadaha nidaamka waxay dhammaantood ku saleysan yihiin saacadaha lagu oggolaaday inaad adeeg bixiso. Haddii aad wax su'aalo ah qabto, fadlan la xiriir Maamulaha Kiiskaaga.

## 9. Waa maxay faalooyinka la sii keydiyo?

- a. Faalooyinka la sii keydiyo waa hawlaha la qabto xilliga booqashada. Marka aad qoreyso waqtiga dhamaadka shaqada, waa qasab inaad doorato ugu yaraan hal faalooyinka la sii keydiyo ah, balse waxaad dooran kartaa kuwa badan iyada oo ku xiran waxa aad qabatay booqashadaadi.

## 10. Sideen farriin u diraa?

- a. Ka dooro sawir calaamadeedka bashqada, kadibna Actions (Ficilada), kadibna New Message (Farriin Cusub) bogga inatarnetka. App-ka taleefonka, guji sawir calaamadeedka bashqada kadibna sawir calaamadeedka farriinta buluuga ah ee cusub ee jirta dhinaca hoose ee gacanta midig.

## 11. Sideen u fiiriyaa farriimahayga?

- a. Dooro sawir calaamadeedka bashqada kadibna guji farriinta aad rabto inaad fiiriso.

## 12. Sidee ayaan ku xaqiijin karaa inay iisoo dhacaan ogeysiisyada qoraalka ah?

- a. Bogga inatarnetka ee OR PTC DCI dhexdiisa, ka guji hagaajinta kadibna xaqiiji taleefon lambarka. Geli taleefon lambarkaaga oo guji Update Mobile Number (Cusbooneysii Lambarka Taleefonka).

## 13. Waa maxay sharciga ganacsi?

- a. Sharciga ganacsi waa siyaasad wargelisa nidaamka inaad wax ka dhex sameeneyso iyo inaad wax ka dhex sameeneynin OR PTC DCI.